

Ku soo dhowaada

Laaxinjire



Cabdiraxmaan Faarax Guri Barwaaqo

Wax la raajaa rag kuma sama ayaa hore loo yidhi ee ku soo dhowaada qormihii beryahaaba la saadaalinayey oo aan filayo inay dad badani raagsadeen. Waa qormihii Laaxinjire oo ah, haddii aanad hore u maqal, qorme cusub oo kumbuyuutar oo kuu saxaya ama kugu baraarujinaya reebidda laaxinka iyo deelqaafka gala maanso cusub oo kolkaa la curiyey , ama mid hore u jirtay oo la shirrabayo.

*Laaxinjire wuxu awood u leeyahay inuu laaxinsaaro toddoba badood oo ka mid ah badaha maansooyinka Soomaaliyeed, kuwaasi oo kala ah: **Jiifto, Geeraar, Maqaley warlaay, Baarcadde, Gabay, Maroodi maroodi**, iyo badda **haanta** loogu heeso kolka caanaha lagu lulayo, kuwaasi oo aannu u aragno inay yihiin kuwa inta badan hadda laga maansoodo. Badaha kale hawshoodii waannu wadnaa ee ha isku deyina inaad Laaxinjire ku shirrabtaan, Kolka aannu dhammayno hawshaa iyada ah waannu idinla soo socodsiin.*

*Sida loo adeegsanayo **laaxinjire** waxad ka akhrisan kartaan qoraalka ladhkiisu yahay: '**Sida loo adeegsanayo Laaxinjire**' ee dhanka midig ee degelka ku qoran. Qofkii doonaya aqoon dheeraad ah oo ku saabsan aragtida Miisaanka Maansada iyo aragtida aqoonaysan ee uu laaxijire ku fadhiyaba wuxu ka akhrisan karaa qoraalka ladhkiisu yahay: '**Qorme Kumbuyuutar oo kuu saxaya Maansada**' ee isna ku yaal dhanka bidix ee degelka. Jaadadka gefefka uu Laaxinjire qabanayo waxad ka heleysaa qoraalkaasi ee aad ugu fiiro lahaada.*

Codsi:

Sidaa aad u arkaysaan waa hawl cusub oo aannu odhan karno waa tallaabo horleh oo loo qaaday dhankii horumarinta afka. Sidaasi awogeed taladiinna iyo tusaalooyinkiinnaba waannu u baahannahay waananu soo dhoweyneynaa ee nala soo socodsiiya oo nagala maagina.

Sidaa iyo adeegsi wacan